Xuquuqda Aadanaha iyo Guriyeynta

Hage loogu talaggalay qaxootiga iyo magangalyodoonka ku nool Waqooyiga Ireland

BOMOKO N.I.

La daabacay Nofeembar 2024

Wax ku saabsan hagahan

Hagahan waxa la sameeyay kaddib markii lala shaqeeyay haween qaxooti iyo haween magangalyodoon ah oo ku nool Waqooyiga Ireland si dadka looga caawiyo inay bartaan oo sheegtaan xuquuqdooda aadanaha. Waxaa soo saaray Ururka Haweenka Qaxootiga iyo Magangalyodoonka ee Waqooyiga Ireland (Bomoko NI) iyo BIHR.

Qaxootiga iyo magangalyodoonka badanaa waxay la kulmaan adeegyada dadweynaha mas'uulka ka ah guriyeynta, caafimaadka iyo daryeelka bulshada iyo waxbarashada.

Buugan wuxuu diiradda saarayaa guriyeynta, iyadoo la aqoonsanayo in dhibaatooyinka la xiriira meesha aad ku nooshahay ay si xun u saameyn karaan qaybaha kale ee noloshaada. Tusaale ahaan, dadka waxaa marar badan loo rari karaa guryo iyaga oo aan la sii ogeysiinin, iyaga oo aan loo sheegin sababta arrintaasi u dhacday, lana siinin wax taageero ah.

Hagahan wuxuu sharxayaa sida xuquuqda aadanuhu noqon karto aalad awood leh marka hay'adaha dadweynuhuqaadanayaan go'aammo saamaynayaa noloshaada (iyo nolosha qoyskaaga).

Tusmada

Sharcigaaga Xuquuqda Aadanaha	Bogga 2
Xaqaaga nolol gaar ah iyo mid qoys, guri iyo wax isu soo diris	Bogga 3
Xaqa aad u leedahay in aan lagu takoorin	Bogga 3
Xuquuqda Aadanaha ee nolosha – Marwo A	Bogga 4
Xuquuqda Aadanaha ee nolosha - Marwo M	Bogga 5
Inaad u hadasho xuquuqdaada aadanaha	Bogga 6

Si aad u ogaayo ururrada laga yaabo inay bixiyaan talobixin iyo taageero, guji halkan si aan u booqato bogga "Get Help" ee website-ka BIHR.

Sharcigaaga Xuquuqda Aadanaha

Xeerka Xuquuqda Aadanaha waa sharci ilaaliya qof kasta oo ku nool Biritayn ay ku jiraan dadka qaxootiga iyo magangalyo-doonka ah. Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu sharci ka dhigaa in hay'adaha dadweynuhu dhowraanxuquuqdeenna aadanaha.

Hay'adaha dadweynuhu waa adeegyada ay bixiso dowladdu. Waxaa ka mid ah Housing Executive ee Waqooyiga Ireland. Noocyada kale ee ururrada sidoo kale waa inay ka jawaabaan xuquuqdaada haddii ay bixiyaan adeeg dadweyne. Tani waxay ka dhigan tahay in ururrada guriyeynta uu saaran yahay waajib ah inay wax ka qabtaan xuquuqdaada.

Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu ilaaliyaa 16 xuquuqood oo muhiim ah. Waxaannu ku darnay laba xuquuqood oo la xiriira dadka qaxootiga iyo magangalyodoonka ah oo buuggan loogu talaggalay.

Hay'adaha dadweynuhu waa inay:

- **Qaddariyaan xuquuqdaada** – Waa inaysan ku xadgudbin xuquuqdaada marka horeba.
- **Ilaaliyaan xuquuqdaada** - Qaadaan tallaabooyin firfircoon si loo hubiyo in xuquuqdaada aanlagu xadgudbin.
- **Fuliyaan xuquuqdaada** - Baaraan marka wax khaldan uu dhaco.

Xaqaaga nolol gaar ah iyo mid qoys, guri iyo wax isu soo diris

Qodobka 8 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha

Xuquuqdan waxay ilaalisaa arrimaha kuu gaarka ah, caafimaadkaaga jireed iyo maskaxeed, xiriirkaaga, bulshadaada, ku raaxaysiga gurigaaga hadda iyo awoodda aad u leedahay inaad go'aammo ka gaarto noloshaada.

Xuquuqdan ma aha mid dhammaystiran, taasi macnaheedu waa mararka qaarkood hay'adaha dawladda waxay gaari karaan go'aammo saameeya xuquuqdan. Waxay sidaas samayn karaan keliya haddii:

1. **Ay sharci tahay:** Sharci aysaa oggolaanaya go'aankaas.
2. **Leh sababo macquul ah:** Waxaa loogu talaggalay sabab wanaagsan, sida in lagaa dhowro waxyeello ku soo gaari karta ama in dadka kale laga dhowro waxyeello.
3. **Xaddidan:** Fursado kale ayaa la tixgaliyay, oo tan waa tan ugu yar ee xaddideysa.

Xaqa aad u leedahay in aan lagu takoorin

Qodobka 14 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha

Xuquuqdan waxay ku saabsan tahay hubinta in qof walba uu si siman ugu heli karo xuquuqda aadanaha. Xuquuqdan waxaa lagu xoojin karaa mid kale oo xuquuqahaaga ka mid ah, sida xaqa nolosha qoyska.

Takooristu waxay noqon kartaa sabab kasta, sida inaad tahay haweeney iyo magangalyo-doon. Takooristu waxay noqon kartaa in laguula dhaqmo si ka xun sida kuwa kale sababo la xiriira waxyaabo adiga kugu saabsan, ama in aan xaaladdaada laguula dhaqmin si ka duwan sida dadka kale loola dhaqmo.

Xaqani wuxuu la shqeeyaa sharciyada sinnaanta Waqooyiga Ireland oo mamnuuca takoorista.

Xuquuqda Aadanaha ee nolosha

Kaddib markii la siiyay sharci qaxootinimo, Mrs. A waxaa la dejiyay guriku-meel-gaar ah oo ay la joogto ninkeeda iyo saddexdeeda carruur.

Carruurta Mrs. A waxay waxay dhiganayeendugsiyo ku yaalla Belfast, laakiin hoteelka ay hadda deggan yihiinwuxuu ku yaallaa meel dhowr mayl u jirta, mana jiro tareen si toos ah u taga, taas oo sababta in marar badan ay ka maqnaadaan dugsiga. Soo rarista ayaa dhacday iyaga oo aan loo sii sheegin goor hore, lamana waydiinin Mrs. A sida isbeddelkan u saameynayo iyada iyo qoyskeeda, sidoo kale lama siinin wax taageero ah oo ay kula qabsadaan isbeddelkan. Qolkii ay daganaayeen waxaa ka buuxa baranbaro. Gurigan ayaa saameyn aan wanaagsanayn ku leh caafimaadka jireed iyo maskaxeed ee qoyska.

Xuquuqda Mrs. A ee ah in la qaddariyi nolosha gaarka ah iyo gurigeeda (Qodobka 8 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha) ayaa halis gali karta. Hay'adaha dadweynuhu waxay xaddidi karaan xuquuqdan oo keliya haddii ay tahay mid sharci ah, sharciyeysan, oo ku habboon baahideeda.

Carruurta Marwo A waan xaq u leeyihiin waxbarasho (Qodobka 2aad ee Borotakoolka1aad Sharciga Xuquuqda Aadanaha).

Guji halkan si aad u hesho xog dheeri ah ku saabsan xaqa waxbarahada iyo xuquuqaha kale ee Sharciga Xuquuqda Aadanaha .

BOMOKO N.I.

Xuquuqda Aadanaha ee nolosha

Markii Marwo. M ay timid Belfast iyada oo magangalyodoon ah oo wadata saddexdeeda carruur, waxaa la dejiyay guri hoy ku-meelgaar ah. Mrs. M iyo qoyskeedu waa Muslin.

Waxay wadaageen qol yar oo hoteel ku yaal halkaasoo Mrs. M ay qasbanaatay inay dharka iskaga beddesho carruurteeda hortooda, taas oo diinteeda iyo dhaqankeeda ka soo horjeedda. Cuntada la siiyay ma ahayn xalaal. Bixinta guri iyo cunto aan ku habboonayn dadka waxay Mrs M ku abuurtay walaac iyo murugo badan.

"Xaaladuhuaad ayay u adkaayeen.. Waxaannu dareennay in nala takooray oo nala dayacay, cidna nagama fikeraynin."

Xuquuqda Mrs. M ee ah inaan loo takoorin (Qodobka 14 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha) ayaa halis gali karta, sababtoo ah waxaa iyaga loola dhaqmi waayay si gaar ah oo waafaqsan diintooda. Arrintan waxaa lagala hadli karaa sarkaal ka tirsan hay'adaha dadweynaha iyo sidoo kale waxaa laga hadli karaa xaqa ay u leedahay nolol gaar ah iyo mid qoys (Qodobka 8 ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha) sababo la xiriira saamaynta ay ku leedahay caafimaadka maskaxeed ee Mrs. M.

Riix halkan si aad wax badan uga ogaato wax ku saabsab xaqa fikirka, damiirka iyo diinta iyo xuquuqaha kale oo ka mid ah Xeerka Xuquuqda Aadanaha.

BOMOKO N.I.

Inaad u hadasho xuquuqdaada aadanaha

Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu ku siinayaa awood marka aad lagu siinayo adeegyada dadweynaha. Weydiisashada in xuquuqahaaga la qaddariyo macnaheedu waa inaad ka codsato in sharciga la raaco. Haddii taas la sameyn waayo, waxaad dacwad sharci ah u gudbin kartaa maxkamadda deegaankaaga ee Waqooyiga Ireland. Laakiin, aqoonta iyo sheegashada xaqaagawaxay kaa caawin kartaa in dhibaatooyinka la xalliyo adiga oo aan qareen lahayn.

Diiwaangeli faahfaahinta xaaladdaada
Ka hor intaadan soo gudbinin arrin ku saabsan xuquuqda, waxaa wanaagsan haddii aad haysato caddaymo muujinaya dhibaatada jirta, mudada ay socotay iyo saameynta ay kugu yeelatay adiga iyo kuwa kale.

Si aan rasmi ahayn uga hadal arrinta
Waa suurtaggal in sarkaal dadweyne uusan ogaanin saameynta uu go'aan kugu yeeshay, sidaas darteed wadaad bilaabi kartaa inaad ka hadasho wajaajibaadka sharciga ah ee Xeerka Xuquuqda Aadanaha iyo xuquuqaha aad ka welwelsan tahay. Tani waxay keeni kartaa xal degdeg ah oo aad ka wada shaqayn kartaan in xalal la helo.

Soo gudbi cabasho rasmi ah
Haddii sidii aan rasmiga ahayn aad uga hadashay arrinta ay shaqayn wayso, cabasho qoraal ah ayaa suurtaggal ah in si dhab ah loo eego. Si cad u sheeg arrinta xuquuqda adaanaga la xiriirta, magacow qodonka lagu xadgudbay iyo sababta, oo soo jeedi waddooyinka kuu furan.
Hay'adaha badankood waxay leeyihiin hab cabasho loo soo gudbiyp ama waxaan cabasho u gudbin kartaa xeernidaamiyaha am Hay'ad Korjoogteeyaha.

Raadso talobixin sharciyeed
Xeerka Xuquuqda Aadanaha wuxuu ku siinayaa awood aad dacwad sharci ah ku soo gudbin kartoWaqooyiga Ireland haddii aad u malaynayso in xuquuqahaaga lagu xadgubay. Haddii tallaabooyinkii hore aysan shaqeynin, waxaad la hadli kartaa qareen si aad u ogaato sida aad wax u qaban karto.

Hagahan waxaa loogu talaggalay inuu noqdo mid macluumaad oo keliya lagu soo gudbinayo. Looguma talaggalin inuu noqdo (ama waa in aanan loo isticmaalin) talo ama hagid sharciyeed ahaan. Waa suurtaggal in sharciga lagu tixraacayo hagan uu isbeddelay tan intii hagahan la daabacay, he.

© 2024 Machadka Xuquuqda Aadanaha ee Biritayn (The British Institute of Human Rights.) Qoraalkan iyo waxa ku qoran waxaa loo isticmaali karaa ama loo qeybin dad u baahan macluumaar ujeedooyin u qareemid awgood. Looma isticmaali karo sababo ganacsi awgood. Haddii s ababo aan ganacsi ahayn awgood loo badsanayo qoraalkan waa in isaga oo aan wax laga beddelin la sheego inuu qoral Machadka Xuquuqda Aadanaha ee Biritayn oo halkan nagala soo socodsii: info@bihr.org.uk Machadka Xuquuqda Aadanaha ee Biritayn (The British Institute of Human Rights) waa hay'ad samafal ah oo diiwaangashan(4978121). Cinwaanka ay ka diiwaangashan tahay waa (lama soo booqan karo): BIHR, 167-169 Great Portland Street, Fifth Floor, noogu soo dir @BIHRHumanRights ama eemayl noogu soo dir info@bihr.org.uk. Machadka Xuquuqda Aadanaha ee Biritayn muu bixiyo talo gaar ah ama mid sharciyeed.. Wixii talo ah ku saabsan meesha aad taageero ka heli karto fadlan booqo www.bihr.org.uk/help

La daabacay Nofeembar 2024